

Caabuqa Covid-19 owgiis waxaa bandow lagu soo rogay guud ahaan dalka Cyprus laga bilaabo 6 Fiidnimo Talaadada kuna beegan 24 bisha Maarso ilaa 13 Abriil 2020 ,

Madaxweynaha Jamhuuriyada Cyprus Mudane Mr. Nicos Anastasiades ayaa ku dhawaaqay maalinti isniinti aheed 23 ka bisha Maarso taalaabooyin wax ku ool ah oo wax looga qabanayo fidida Caabuqa Caronavirus Covid-19 gudaha Cyprus,

Si talaabooyinkaasi loo qaado waxaa la go'aamiyay talooyinka cilmiyeysan oo ay dowladu soo saartay, Madaxweynaha hoosta ka xariiqay in uu san waxba ka qabin ka dhanqan galintooda guud ahaan Cyprus ,

Kala firirsanaanta iyo koontarool la'aanta arintaan ayaa waxey sababikaree in ay dumaan heykalka Caafimaad iyo Qaabdhismood kooda wangaasan, mana awoodi doono ka jawaabida baahida sii kordheyso'' ayuu yiri

Sida wixii nadixta la haa ee ka dhacay Talyaaniga Iyo Spain ee dhaqaatiirta ku kaliftay kala doorashada yaa noolaanaya iyo yaa laga tagaa oo geerinyoonayo,

Talaabooyinka soo socdo ee la dhaqan galayo 6 Fiidnimo laga bilaabo talaadada 24 ka maarso ilaa 13 ka abriil ;

1. Waxaa la joojiyay dhaamaan dhaqdhaqaaqa aan muhiim ka ahaan 6 Fiidnimo laga bilaabo talaadada 24 ka maarso ilaa 13 ka abriil marka laga reebo

i. Kabixida iyo Aadida goobaha Shaqo

ii. gaarsiinta wax yaabaha daruuriga ah ee goobaha ganacsiga iyo dukaamada hadii aan laga maarmin

iii. Booqashada dhaqaatiirta iyo Farmashiiyayaasha

iv. Booqashada Bangiyada hadii aysan la heen aaladaha aad ugu maarmi karto

v. Gaarsiinta howlaha gar gaarka muwaadiniinta iyo dadka aan is daryeeli Karin iyo kuwa ku jiraan Karaantiilka iyo mudada huurinta.

vi. Booqashada Qaraabada dhow iyo xafladaha , tacsiyadaha , aroosyada , kulumada diimaha, waxaana loo ogol yahay in aysan ka badan 10 qof,

vii. Socodalka jirdhiska ah iyo kuwa damaashaadka ah waa in aysan ka badan 2 qof lagana yareeyaa goobaha ay dadku degan yihiin,

Dhaamaan shuruudahaas waxaa qof walba oo socodo laga doonayaa in uu sito aqoonsigiisa iyo cadeynta sababta uu u socdo,

faah-faahnta sida loo dhaqan galinayo dhawaan ayaa lagu dhawaaqi doonaa

2. Ilaa amar dambe laga bilaabo 6 Fiidnimo Talaadada kuna beegan 24 bisha Maarso ilaa 13 Abriil 2020 waxaa la xirayaa,

i. Goohaba nasiinada ,

ii. Garoomada lagu ciyaaro ,

iii. Goobaha ciyaaraha ,

iv. Goobaha bulshadu ku kulanto sida , iskuweerada , biyo xireenada, jaradiinooyinka la fariisto, xeebaha , badaha,

3. Ganacsiyada Tafaariikhda ah ee goobahaas waa la joojiyay marka laga reebo ganacsiga weyn waxaana degreeto ka soo saareyso wasaarada Caafimaadka dhawaan,

4 Suuqyada furan iyo kuwa guur guura ee wax iibiya waa la mamnuucay dhamaantood,

5 Shaqooyinka dhismaha waa la joojiyay marka laga reebo kuwa dadweyha daruuriga ah ee ogolaasha ka heysta wasaarada gaadiidka iyo guryeynta ,

6. Waxaa la mamnuucay tagida goobaha diimaha sida Kaaniisadaha , masaajida , iyo goobaha lagu dukado.

7 .Waxaa la mamnuucay [Christian Orthodox Easter] custom of "lighting a bonfire"

Madaxweynaha wuxuu digniin u diray cidii ku xad gudububto awaamiirtaasi kor ku xusan iyaga oo mutesan doonaan gaanax lacageed oo dhan EUR 150

Go'aamada kale ee lagu taageerayo howlaha ka hortaga iyo xoojinta howlaha caafimaada darteed waxaa la go'aamiyay Qodobadan soo socdo,

1, Goobaha baaritaanada iyo ogaanshaha Caabuqa Coronavirus sida xarumha caafimidaa, Biyooolaji-ga , jaamacadaha , sheybaarada waxaa soo cayimidoonta wasaarada Caafimaadka,

2:- Waxaa la go'aamiyay in ay ka qeyb qaataan ardayda sanadaha 5 aad iyo 6 xaad ee iskuulaadka sarre, jaamacadaha iyo Kalkaaliyaasha caafimaad hadba meesha ay aqoontooda leeyihiin,

3. Si loo dhaqan galiyo ka hortaga iyo daaweynta, waxaa la kordhinaa shaqaalaha caafimaad ee magaaloooyinka ,

Gabgabadiina madaxweynaha waxa uu idin ku waaninaa in aad joogtaan guryihiina , goobihiina waa arin nawada sameyn doonta iyo waqti adag

Nabadd-gala #Taxadara #Naxariislaahaada

#BeSafe #Be Smart #BeKind